

4<sup>th</sup> September 2020

Waalidka/Daryeelaha qaaliga ahow,

Waxaan kuugu soo qorayaa si aan kuu ogeysiyo in Goldfinch uu la shaqeyo Place2Be, hay'ad samafal qaran oo taageeraysa dugsiyada si loogu hagaajiyo kalsoonida iyo ladnaanta carruurta iyo dhallinyarada.

Place2Be waxay bixisaa taageero shucuurta iyo daaen/dabiiib taageero ah oo loogu talagalay ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha in ka badan 250 dugsi oo wadanka oo dhan ah ku yaala.

Waxay ardayda siineysaa barxad ay ku muujiyaan naftooda iyadoo lala hadlaayo oo shaqo hal-abuur ah lala qabanaayo, iyo in laga fikiro wixii walwal ah ee ay qabaan. Place2Be waxay kaloo ay taageero siisaa waalidiinta iyo shaqaalaha. Waxoogaa macluumaad ah ayaa la socda si laguugu sheego wax badan oo ku saabsan Place2Be iyo shaqadooda.

**Place2Talk** Mid ka mid ah qaybaha ugu caansan ee adeeggan waxaa loo yaqaan 'Place2Talk'. Waxay u furan tahay dhammaan ardayda, waxaanay qabsan karaan balan si ay 15 daqiiqo ula joogaan la lataliye tabobar leh, iyaga oo kaligood ah ama uu saaxiib la socdo. Isku celcelis ahaan, qiyaastii saddex meeloodo meel ardayda dhigata iskuulada Place2Be ayaa sanad kasta ka faa'iideysanaya adeeggan. Ardaydu inta badan waxay ka hadlaan saaxiibtinimo ama wixii walwal kasta ee ay qabaan.

Place2Be waxay diiwaan galin doontaa magaca ilmahaaga, taariikhda dhalashada, kooxda sanadka, jinsiga, jinsiyadiisa, mawduuca guud ee laga wada hadlaayo iyo wixii ficil ah ee la qaaday natiijada ka soo baxda kulanka darteed. Macluumaadkan waxa loo kaydiyaa si ammaan ah. Waxa loo isticmaalaa qaab koodh fure ah leh si loogu qiimeeyo adeega Place2Be oo adeegayaga kor loogu qaado. Fadlan fiiri xaashida goonida ah, ee dhamaadka waraaqdan, wixii macluumaad dheeraad ah ee arrintan ku saabsan

### Ogolaanshaha Waalidka ee Helitaanka Place2Talk

Haddii aananu wax kale kaa maqal adiga, ayaa dugsiyada iyo Place2Be ay u qaadanaayan in ilmahaagu uu haysto fasaxa waalidka/daryeelaha si uu ugu yimaado Place2Talk.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ogaatid wax dheeraad ah, ama aad doorbidayso in ilmahaagu aanu isticmaalin adeeggan, fadlan la xiriir Catriona Ross (Maamulaha Mashruuca Dugsiga ee Place2Be) 0208 773 7455 kuwaas oo aad ugu faraxi doona inay kaaga jawaabaan su'aal kasta.





Mrs Emilie Haston, Head Teacher

.....

Ma doonayo in ilmahaagu ka qayb qaato Place2Talk.

Magaca ilmaha/qofka dhallinyarta ah ..... Fasalka/Sanad dugsiyeedka.....

Magaca waalidka/daryeelaha.....

Saxeexa .....

Taariikhda .....

